Ireland

An Roinn Dlí agus Cirt,
Gnóthaí Baile agus Imirce
Department of Justice,
Home Affairs and Migration

EUROPEAN UNION
AGENCY FOR ASYLUM

# WAXA AAD U BAAHAN TAHAY INAAD KA OGAATO CODSASHADA MAGANGALYADA

MACLUUMAADKA CARRUURTA AAN LALA SOCON




Salaam, waxaan nahay carruur ka kala timid waddamo kala duwan. Waxaan soo marnay dariiq dheer kahor intaanan iman Ireland si aan u raadsano ilaalin. Waxaan nimidnay kaligayo, iyadoo aanu nala socon waalid.
Salaam. Magacaygu waa Lisa. Waxaan kuu sharxi doonaa waxa aad u baahan tahay inaad ogaato marka aad codsanayso magangalyo (oo sidoo kale loo yaqaan ilaalinta caalamiga ah).



# Waa maxay ilaalinta caalamiga ah?





Haddii qof uusan ugu laaban karin dalkiisa hooyo sababtoo ah halis ayuu halkaas ku waajahayaa, wuxuu heli karaa ilaalin caalami ah oo wuxuu nabad ku joogayaa dalka siiyay ilaalintan.

Masuulkaaga ayaa kuu sharxi doona faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan cidda aad ka heli karto ilaalinta caalamiga ah iyo waxa uu yahay habraacu.

Yurub gudaheeda, ilaalinta caalamiga ah waxaa kale oo loo yaqaan magangelyo, xaalad qaxooti ama ilaalin-hoosaad. Waxa laga yaabaa inaad hore u maqashay erayga magangalyo. Markaan ka hadlayo ilaalinta caalamiga ah waxaan adeegsan doonaa ereyga magangelyo maadaama ay kuu fududahay inaad xasuusato.

## Xasuusnow, hadda waxaad tahay ammaan.


Dhammaan dadka si siman ayaa loola dhaqmaa Yurub, iyadoon loo eegin meesha ay ka yimaadeen, diintooda, ama midabka maqaarkooda.





Yurub, qof kasta oo ka yar 18 sano waxaa loo tixgeliyaa inuu yahay cunug.

Ilmo ahaan waxaad leedahay xuquuqo gaar ah. Badqabkaaga iyo fayo-qabkaagu aad bay muhiim u yihiin.



Waxaad la kulmi doontaa masuuliyiin kala duwan, sida shaqaalaha maamulka magangelyada, sida halkan lagu muujiyey. Waxay ku weydiin doonaan su'aalo ku saabsan naftaada iyo safarka aad ku timid Yurub.

Xasuusnoow, masuuliyiintu waxay halkan u joogaan inay ku ilaaliyaan oo ay go'aamiyaan waxa adiga kuu fiican.

Mar walba waad la wadaagi kartaa masuuliyiinta waxa aad u malaynayso, waxa aad u baahan tahay, iyo sida aad dareemayso.



# Wa'ayo masuulku?





Maadaama aad halkan timid adigoon waalidkaa la soconin, maamulku waxay kuu magacaabi doonaan qof weyn oo loo yaqaan masuul kaasoo ku caawin doona.

Masuulku waa qof ka caawiya carruurta yimaada Yurub iyagoo aan la soconin waalidkood ama qof kale oo masuul ka ah.

Masuulku wuxuu noqon karaa gabadh ama nin. Masuuliyiinta waxa sidoo kale loogu yeedhi karaa wakiilo

Haddii aadan weli la kulmin masuulkawakiilkaaga, waxaad la kulmi doontaa iyaga sida ugu dhakhsaha badan.





Masuulku wuxuu halkan u joogaa inuu kuu sharaxo wax kasta oo aad u baahan tahay inaad ka ogaato joogitaankaaga iyo inuu kaa caawiyo inaad gaadho go’aanno muhiim ah. Tusaale ahaan, masuulku wuxuu ku caawin doonaa codsigaaga magangalyo, wuxuu kuu sharixi doonaa habraacyada, xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga, wuxuuna kaala qaybqaadan doonaa kulamada maamulka.

Mar walba waad u sheegi kartaa masuulka fikradaada, waydiin kartaa su’aalo, oo u sheegi kartaa haddii aad wax u baahan tahay. Waxay halkaa u joogaan inay ku caawiyaan.



Haddii wax dhibaato ahi kaala dhexeeyo masuulkaaga, u sheeg masuuliyiinta Xaruntaada Hoyga.. Wax saamayn xun ah kuma yeelan doonto codsigaaga.



## Waa maxay caawimada lagu siin doono inta lagu jiro habraaca?





goob ammaan ah oo aad joogto



dharka



waxyaabo kale oo aad u baahan karto



cuntada



waxaad u tagi kartaa dhakhtar



waxaad aadi doontaa dugsi



Waxaad ku noolaan doontaa meel kuu fiican oo aad heli doonto taageerada aad u baahan tahay iyadoo ku xidhan da'daada.

# Waxaan weydiistay magangalyo, maxaa dhici doona hadda?






**Marka koowaad, codsigaaga waa in la diwaangaliyaa oo la diraa.**

Codsigaaga waa la diiwaangalin doonaa oo gudbi isla maalintaasi, muddo 10 maalmood ah kadib markaad codsatay magangalyada.

Kadib waa in la diraa codsigaaga 21 maalmood gudohood ee diiwaangalinta.

Dadka waaweyn ee ka shaqeeya halka aad ku nooshahay waxay kugu wargalin doonaan maalmaha iyo wakhtiga oo masuulkaaguna wuxuu kuu raaci doonaa markaad u tagayso maamulka.

Masuulkaagu wuxuu kula joogi doonaa inta lagu jiro habraaca.



# Inta lagu guda jiro diiwaangelinta iyo gudbinta, waxyaabaha soo socda ayaa dhici doona...



Waxaad masuuliyiinta tusin doontaa dhammaan dhukumantiyada aqoonsiga ee aad haysato (baasaboor, kaadhka aqoonsiga, iwm).



Waxaa dhici karta in adiga iyo alaabtaada gaarka ah la baadho. Maamulku waxay haysan karaan alaabtaada muddo gaaban, laakiin waxay ku soo celin doonaan wax walba, marka laga reebo alaabta khatarta leh.



Waa lagu sawiri doonaa



Farahaaga ayaa la qaadi doonaa.



waxaad arki kartaa dhakhtar



- masuul ayaa ku weydiin doona su’aalo ku saabsan naftaada iyo qoyskaaga ku sugan Yurub



masuul ayaa kaa codsan doona inaad bixiso faahfaahintaada halka lagaala soo xidhiidhayo (cinwaankaaga iyo lambarka taleefankaaga).



Waxa lagu weydiin doonaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan:

- adiga iyo qoyskaaga
- waddankaaga iyo goobihii aad hore ugusoo noolayd
- sababta aad uga soo tagtay waddankaaga iyo sababta aanad u rabin inaad u laabato
- sida aad kusoo safartay Ireland





## Xasuusnow!

Waa muhiim aad u weyn inaad la hadasho masuulkaaga oo aad si wadajir ah ula shaqeyso maamulka magangalyada.




Waxaad u sheegto masuulkaaga ama maamulka kale waxay ahaan doonaan **sir**. Tani waxay ka dhigan tahay in macluumaadka aad siiso aan marnaba lala wadaagin dowladda dalkaaga ama dadka aad ka cabsato.

# Ma waxaan joogayaa Ireland inta lagu jiro habraaca magangalyada?





Ka dib diiwaangelinta, maamulka waxay go’aamin doonaan dalka baadhaya codsigaaga. Wuxuu noqon doonaa Ireland ama waddan kale oo Yurub ah. Ma dooran karto dalka, laakiin danahaaga ugu wanaagsan ayaa la tixgelin doonaa. maamulka ayaa kuu sharixi doona.





Waa muhiim inaad maamulka u sheegto inta lagu guda jiro diiwaangelinta:

- haddii qoys kuu joogo waddan kale oo reer Yurub ah
- haddii aad hore uga codsaday magangalyo dal kale oo Yurub ah.

Haddii aad qoys ku leedahay Yurub, waxaa muhiim ah inaad masuuliyiinta u sheegto wax kasta oo aad ka taqaan qoyskaaga. Waxaa dhici karta inaad la noolaato iyaga, ha ahaato dalka aad joogto ama dalka ay ku nool yihiin.

Haddii aanad garaneyn halka uu joogo qoyskaagii, ama uu kaa lumay halkii aad kala xidhiidhaysay, waxaad weydiisan kartaa masuulkaaga aad u hesho caawimaad aad ku raadiso qoyskaaga.



# Maxaa dhici doona kadib diiwaangelinta iyo gudbinta codsiga?





Ka dib diiwaangelinta, waxaad heli doontaa dhukumanti (ku meelgaadh ah) oo cadeynaya in codsigaaga la sameeyey oo la diiwaangeliyey.

Marka aad is ee aad gudbisay codsigaaga, waxaa lagu siin doonaa dhokumanti dijitaal ah oo loo yaqaan Kaarka Codsadaha Ilaalinta Caalamiga ah  kaasoo sheegaya inaad tahay codsade magangalyo. Dhokumantigani waa muhiim markaa waa inaad ilaalisaa. Had iyo jeer qaado markaad ka baxeyso meesha aad ku nooshahay ama markaad la kulmeyso maamulka.



# Maamulku sidee ayay u ogaan doonaan da’dayda?





Haddii aadan haysan dhukumantiyo muujinaya da’daada iyo haddii maamulku ka shakiyaan da’daada, shaqaalaha hay’ada magangelyada ayaa kaa codsan kara inaad marto qiimayn da’da lagu eegayo. Hawshanni waxay ka caawinaysaa in la qiyaaso da'daada.

Waxa jira habab kala duwan oo lagu qiyaaso da'daada.

Tusaale ahaan, waxay ku saleynaan kartaa dhukumantiyada aad soo gudbisay ama wareysiyo ay weheliyaan maamulka ama khubaro kala duwan. Haddii shaki dheeri ah jiro, waxaa lagaa codsan karaa inaad gasho baadhitaan caafimaad. Xaaladdan, adiga iyo masuulkaaga ayaa lagaa codsan doonaa inuu bixiyo oggolaansho.

Haddii qiimaynta da’da ay soo gababgabeyso inaad ka weyn tahay 18 sano, waxaa lagu tixgelin doonaa inaad tahay qof weyn. Inta lagu jiro xaaladan, waxaad heli doontaa macluumaad dheeraad ah.





Haddii maamulku ay u arkaan in qof uu ku dhaawacay, waxay ku soo jeedin doonaan inaad la kulanto dhakhtar.

Natiijooyinka baadhitaanka caafimaad ayaa la tixgelin doonaa marka codsigaaga la baadhayo.



**Ka dib marka codsigaaga la gudbiyo, waxaa laga yaabaa inaad yeelato hal ama in ka badan oo waraysi gaar ah.**

Tani waxay ka dhigan tahay in sarkaal uu ku weydiin doono su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan adiga, sababta aad ugasoo tagtay dalkaaga, iyo sababta aadan u doonaynin inaad ugu laabato. Haddii maamulku ku weydiiyaan inaad ka qeyb gasho waraysi, waa inaad ka soo qeyb gashaa oo aad u sheegtaa wax kasta oo aad xasuusato. Waraysiga gaarka ah cod ahaan ayaa la duubi doonaa.

Masuulkaaga ayaa kuu sheegi doona goorta iyo meesha uu waraysigu ka dhici doono, wuxuuna ku taageeri doonaa inta uu wareysigu socdo.



# Ka warran haddii aanan fahmayn luuqadda maamulka?





Haddii aanad fahmayn Ingiriisiga, turjumaan ku hadli kara luuqaddaada ayaa kaa caawin doona inaad fahanto.

Turjumaanku malaha door kale oo aan ahayn inuu turjumo waxa la yidhi. Waxaad u sheegto masuulka kiiska haya iyo turjumaanku waxay ahaan doonaan kuwo sir ah.

Iyadoo ku xidhan waxa aad ku dareento nafis badan, waxaad codsan kartaa in wareysigaaga ama turjumaankaaga uu noqdo dumar ama rag. Way ku siin doonaan haddii la heli karo. U sheeg wakiilkaaga haddii aad doorbidayso dumar ama rag sida ugu dhaqsaha badan ka hor inta aan waraysigu bilaaban.



# Intee inleeg ayay qaadan kartaa guud ahaan?






Ka dib waraysiga, waxa kasta oo aad sharaxday waa la baadhi doonaa.

Laga bilaabo maalinta codsiga la gudbiyo, waxaa laga yaabaa inaad sugto ilaa **6 billood** si aad u hesho go’aankaaga. Mararka qaarkood, waxay qaadan kartaa waqti dheer, laakiin waa inaysan ka badnaan **21 billood.** Sugitaanku wuxuu noqon karaa mid dhib badan laakiind dulqaad yeelo. Maamulku waxay doonayaan inay qaataan go'aanka kugu saxsan.

Mar walba waad weydiin kartaa masuulkaaga haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad ula tacaasho sugitaanka.




**Saaxiib ayaa yiri mas'uuliyiintu ma eegi doonaan codsigiisa magangelyo. Maxaa sababta?**



Mas'uuliyiintu marka hore waxay hubiyaan haddii ay tahay inay baaritaan ku sameeyaan codsiga magangelyada ama maya.

Maamulku codsigaaga si buuxda uma eegi karaan haddii horey laguu siiyay ilaalin dal kale ama haddii aad ka timid dal ay u arkaan mid ammaan ah.



# Go’aan noocee ah ayaan heli doonaa?





Maamulka magangalyada ayaa go’aamin doona haddii aad u baahan tahay magangalyo ama haddii ay jiraan fursado kale oo kuu banaan.

Go'aanka waa laguu sharixi doonaa.



Haddii aad hesho go’aan diidmo ah oo adiga ama wakiilkaaga aad ka soo horjeeddaan, waxaad si aad uga dooddo. Kani waxaa la yiraahdaa racfaan.






# Sideen ku heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka magangalyo?





Marka laga tago masuulkaaga, waxaa sidoo kale jira la-taliyeyaal sharci oo kuu sharxi kara habka magangalyo, xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga.

Weydii masuulkaaga sida loola xidhiidho iyaga.



Haddii aad rabto in qareen ku caawiyo, la hadal masuulkaaga ama sarkaal kale.





**Qareenka, oo ay wehliyaan wakiilkaaga, ayaa kaa caawin kara inaad:**



diyaariso waraysiga aad la yeelanayso maamulka.



la hadal maamulka magangalyada



fahanto go’aanka codsigaaga magangalyada iyo sida loo qaato racfaan, haddii adiga ama wakiilkaaga aydaan ku raacsaneyn go’aankaas.



Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa UNHCR wakhti kasta inta uu socdo habraacaaga magangalyo.

UNHCR waxay taageertaa oo ilaalisaa codsadayaasha magangalyo iyo qaxootiga.

Dadka ka shaqeeya UNHCR waxay raadinayaal magan-gelyo siinayaan macluumaad iyo caawimaad. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah https://help.unhcr.org/.



UNHCR
The UN Refugee Agency

# Sideen caawimaad ku heli karaa haddii aan xanuunsanahay ama haddii aan mar walba welwelsanahay?





U sheeg masuulkaaga, sarkaal ama shaqaalaha ka shaqeeya meesha aad joogto haddii:



Qof uu ku dhaawaco

Aad dareento murugo, cadho, ka cabsato ama ay hurdadu kugu adkaato


Haddii aad qabto dhibaatooyin kale sida naafo, xanuun, ama haddii aad uur leedahay

Kiisaska noocaas ahwaxaad heli doontaa caawimo

# Miyaa laygu leeyahay waajibaadyo?



**Haa**



**Waa inaad raacdaa shuruucda iyo qawaaniinta waddankan.**

Haddii shaki kaga jiro xeerarka ama sharciga, weydii wakiilkaaga.




**Waa inaad joogtaa meesha uu wakiilkaagu kuu sheegay inaad joogto.**

Maamulka ayaa kuu dooray goob adiga. Ha baxsan ama ha tagi Ireland adigoon fasax ka haysan maamulka.



**Waa inaad la shaqaysaa maamulka.**

Markay kaa codsadaan, waa inaad uga jawaabtaa su'aalahooga oo aad raacdaa tilmaamahooda.



**Daacad ka ahow oo u sheeg maamulka wax kasta oo aad ogtahay markay ku weydiiyaan su'aalo.**

Waxaad sheegtaa waxa uu aad muhiim ugu yahay codsigaaga.

Waxaa dhici karta inaadan xasuusan wax walba oo waxaa dhici karta inaadan ka jawaabi karin dhammaan su'aalaha. Haddii aanad xasuusan, ha samaynin jawaabta, laakiin sharax inaanad xasuusan.

**Waa inaad timaadaa dhammaan ballamahaaga aad la leedahay maamulka.**

Ballamahan waa kuwo aad u muhiim ah. Waa inaad kasoo muuqataa wakhtiga iyo maalinta lagu siiyay.







**Waa inaad siisaa halka saxda ah ee lagaala soo xidhiidhayo.**

Si loo hubiyo inaad hesho dhammaan macluumaadka iyo ballamaha, waa inaad maamulka siisaa cinwaan ama lambarka taleefanka. Wakiilku sidoo kale wuxuu heli doonaa macluumaadkan wuxuuna ku xasuusin karaa ballamahaaga. Haddii macluumaadkaaga halka lagaala xidhiidhayo uu isbeddelo, u sheeg wakiilkaaga iyo shaqaalaha maamulka magangalyo. Waa muhiim inay kulasoo xidhiidhi karaan.

**Waa inaad mas'uuliyiinta siisaa dhammaan dhukumantiyada aad haysato.**

Siiso dhammaan dhukumantiyada aad haysato ee ku saabsan adiga iyo sababaha aad uga tagtay dalkaaga. Tani waxay ka mid tahay dhukumantiyada aqoonsiga (baasaboor), shahaadada dhalashada ama dugsiga, dhukumanti caafimaad ama dhukumantiyo kale.

Waa inaad u gudbisaa dhammaan macluumaadka iyo dhukumantiyada sida ugu dhaqsaha badan.

Haddii aadan hadda haysan dhukumantiyada, waxaad ku soo gudbin kartaa goor dambe. La hadal masuulkaaga. Wakiilkaaga wuxuu kuu caawin karaa inaad hesho dhukumantiyadaas iyo inaad waqtigooda ku wadaagto maamulka.

**Haddii aadan fulin karin waajibaadkaaga, si degdeg ah ugu sheeg wakiilkaaga iyo shaqaalaha xafiiska magangalyo oo sharax sababta.**





# Maxaa dhici doona haddii aanan fulin waajibaadkayga?



Haddii aadan fulin waajibaadkaaga, codsigaaga waxaa saameyn taban ku yeelan kara.

Waxaad lumin kartaa qaar ka mid ah xuquuqda iyo adeegyada taageerada



**Nidaamkaaga magangalyo waxaa la joojin karaa ama waa la diidi karaa haddii aadan fulin waajibaadkaaga, tusaale ahaan haddii:**

- aadan ka jawaabin su’aalaha maamulka, ama
- aadan u oggolaan in la qaado farahaaga, ama
- aad ku tagto meesha aad joogto adigoon fasax haysan.

Xaaladahaas, maamulku waxay u maleyn doonaan inaadan si dhab ah u danaynin codsigaaga Waxaad joojin doontaa inaad ahaato codsade, waxaadna lumin doontaa dhammaan taageerada la bixiyo



Haddii aadan u sheegin maamulka runta ku saabsan naftaada ama sheekadaada, ama haddii aad qariso macluumaad muhiim ah ama si kutalagal ah u burburiso dhukumantiyadaada, codsigaaga waa la diidi karaa waxaana laga yaabaa inaadan helin magangalyo.



Haddii maamulku ogaadaan goor dambe inaadan runta sheegin inta lagu guda jiro habka magangalyada, magangalyadaada waa lagaa qaadi karaa.






Waxaan ku sharaxay waxyaabaha ugu muhiimsan ee aad u baahan tahay inaad ogaato. Masuulkaaga iyo maamulka waxay ku siin doonaan sharaxaad dheeraad ah inta lagu guda jiro habka magangalyada.





**Xasuusnow!**

**Codsiga magangalyadu waa bilaash**






# Taxadar yeelo

Ka taxaddar dadka kaa caawinaya adigoo bixinaya adeeg ama lacag. Waxa laga yaabaa inay wax xun uga jeedaan.



Qof ayaa laga yaabaa inuu ku dhiirrigeliyo inaad isku daydo inaad baxdo. Laakiin xasuusnoow inaadan bixin, maadaama tani ay kuu noqon karto mid khatar ah.






Si degdeg ah u sheeg masuulkaaga, ama dadka waaweyn ee ka shaqeeya meesha aad joogto, haddii qof uu isku dayayo inuu ku qanciyo inaad sameyso wax aadan rabin ama wax u muuqda khalad.



**Haddii aan rabto inaan ku laabto waddankayga hooyo oo aan joojiyo codsigayga, maxaan sameeyaa?**





Haddii aad rabto inaad ku laabato waddankaaga hooyo oo aad joojiso codsigaga, u sheeg masuulkaaga iyo maamulka. Waxay kaa caawin karaan inaad si badqab ah u laabato.



**Haddii aad qabto su’aalo dheeraad ah oo ku saabsan waxa aan hadda sharaxay, weydii masuulkaaga, maamulka, ama shaqaalaha ka shaqeeya meesha aad joogto.**



Buug-yarahan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya. Keligii ma abuuro xuquuq ama waajibaad. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, oo dibusoo saarida iyo waxkabaddelka warqadani waxay u oggolaatay EUAA kaliya Waddamada Xubnaha ka ah EU. EUAA ma qaado wax mas’uuliyada ama xil ku saabsan saxsanaanta, nuxurka, dhameystirnaanta, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay bixiyeen Waddamada Xubnaha ka ah EU ama dhinac saddexaad oo mas’uul ah. EUAA iyo cid kasta oo ku shaqaysa magaca EUAA midna mas’uul kama aha isticmaalka laga yaabo in laga sameeyo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025